Warqad ka socota Kormeeraha Guud iyo Guddida Waxbarashada Denver

Qoysaska Qaaliga ah,
Sidaad ogtihiin, waxaanu dadaal ugu jirnay inaanu heshiis la gaadhno ururka macallimiinta 15 bilood ee lasoo dhaafay. Waxaanu ka xunnahay inay u codeeyeen inay shaqo-joojin sameeyaan waxaanan ka walaac qabnaa inay khakhal tani ku keento carruurta, qoysaska iyo bulshada. Laakiin, waxaan marka isku sii diyaarinaynay haddii ay timaado inay shaqo-joojin sameeyaan waxaanan diiradda saaraynay sidii aanu u xaqiijin lahayn in dugsiyadeenu uu sii wadaan inay noqdaan meel ammaan ah oo ay wax ku bartaan ardaydayadu.

Waxaanu samaynay hagahan si aanu uga jawaabno wixii su'aalo ah oo aanu qoysaska ugu siino wixii macluumaadka daruuri ah. DPS waxaa ka go'an inay dugsiyadu furnaadaan, oo ay bixiyaan adeeggii cuntada oo uu sidiisii ugu socdo adeeggii baska jadwalkiisii caadiga ahaa.

Haddii aad qabto wax su'aal ah, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad soo wacdo Khadka Caawimada ee Qoyska ee DPS ee 720-423-3054 inta u dhaxaysa 7:30 subaxnimo - 5:30 galabnimo, Isniin ilaa Jimce, si aad ula hadasho xubno Kooxda Kaqaybgalinta Qoyska iyo Bulshada. Waxay kugu xidhi karaan taageero luuqadda aad doorbidayso ah, haddii loo baahdo.

Fadlan wixii macluumaad ah ee soo kordha kala soco websaytka degmada ee teacherstrike.dpsk12.org iyo Facebook iyo Twitter.

Waad ku mahadsan tahay taageeradaada inta aynu ku jirno dadaalka wakhtigan adag lagaga gudbayo.

Kii Daacadda Kuu Ahaa,

Susana Cordova
Kormeeraha Guud

Anne Rowe
Degmada 1
Madaxwaynaha Guddida

Barbara O'Brien
La Laayahay
Madaxwayne ku-Xigeen

Lisa Flores

Qasnajiga Degmada 5

Carrie A. Olson, PhD
Degmada 3
Xoghayaha

Allegra "Happy" Haynes
La Laayahay

Jennifer Bacon
Degmada 4

Angela Cobián
Degmada 2

FAQ (SU'AALAHA BADANKA LA ISWAYDIIYO)

Waa maxay shaqo-joojini?
Shaqo-joojintu waa marka xubnaha shaqaalaha ee ururka shaqaaluhu diidaan, qaab muddaharaad ah, inay shaqeeyaan, sida badan si ay cadaadis ugu saaraan loo-shaqeeyahooga inuu yeelo dalabaadkooda. DPS iyo ururka macallimiinta deegaanka — Ururka Macallimiinta Fasalka ee Denver (Denver Classroom Teachers Association) (DCTA) — waxay si joogto uga wada gorgortamaan shuruudaha heshiiska shaqada ee u dhexeeya macallimiinta fasalka, bixiyayaasha adeegga gaarka ah (sida la-taliyaha dugsiga, dhakhtarka cilmi nafsiga dugsiga, kaaliyayaasha caafimaadka ama dhakhaatiirta hadalka luuqadda) iyo degmada.

Ilaa iyo bilawgii 2018, DPS iyo DCTA waxay ku jireen gorgortan Heshiiska ProComp, nidaamka mushaharka ee macallimiinta gunnadooda lagu siiyo ee ay kaga shaqeeyaan dugsiyada aadka u saboolka ah ama meelaha ku adag shaqaalaha. In kasta oo labada dhinacba ay u galeen dadaal sidii loo heshiin lahaa, xubnaha ururku waxay u codeeyeen inayna aqbalin heshiiskii lagu taliyay oo ay shaqo-joojin sameeyaan, taas oo macnaheedu tahay in macallimiinta qaar ayna iman doonin shaqada shaqo-joojinta darteed ilaa heshiis ay la gaadhayaan DPS. Shaqo-joojinta waxaa kamid ah, inay xubnaha ururku isku iman karaan meel, ama bannaanka dhismaha dugsiga ka muddaharaadi karaan. Waxaa la keeni doonaa nabadsugid dheeraad ah taxaddar ahaan.

Miyey tahay ardayda inay aadaan dugsiga haddii ay shaqo-joojin jirto?
Haa. Dhammaan dugsiyadeenu way furnaan doonaan saacadaha caadiga ah ee shaqada. Ardaydu waa inay u yimaadaan dugsiga sidii caadiga ahayd.

Ma ammaanbaa in ardayga dugsiga loo soo diro?
Haa. Shaqaalaha DPS ayaa joogi doona xarun kasta si ay u xaqiijiyaan ammaanka ardayda waxbarashadu socoto. Xubnaha Kooxda Ammaanka DPS waxay kala shaqaynayaa hoggaanka dugsiga si loo xaqiijiyo in dhismaha la geli karo inta muddaharaadku socdo.

Miyuu jadwalka dugsigaygu isbeddeli?
Maya. Xilliga shaqada ee dugsigu sidooda ayey sii ahaan — oo ay kujiraan daryeelka dugsiga hortii iyo dabadii ee barnaamijka Discovery Link iyo barnaamijkeeda awoodsiintiisa. Cuntada dugsiga iyo adeegga basku waxay raaci doonaan jadwalkii caadiga ahaa, sidoo kale.

Ardaydu ma waxbay baran doonaan inta shaqo-joojintu socoto?
Haa. Shaqaalaha DPS oo aqoon leh, oo ay kujiraan macallimiin aqoon leh oo marti ah iyo maamulayaasha macallimiin laga dhigay, ayaa dugsiyada wax ka dhigi doona inta shaqo-joojintu socoto. Waxaanu lahaan doonaa cashar diyaarin fasalka iyo maaddooyinka gaar u ah si macalimiinta martida ahi ay u siin karaan ardayda casharo tayo leh.
Wixii su'aalo ah ee ku saabsan walaac gaar ah, sida saamiga ardayga iyo macallinka ama joogtaynta manhajka, fadlan la xidhiidh dugsigaaga wixii macluumaad dheeraad ah.

Dugsiyadu ma sii wadi doonaan bixinta cuntada?
Haa. Adeegga cuntada dugsigaagu wuxuu sii wadi doonaa inuu cuntooyinka oo dhan sidii caadiga ahayd u bixiyo.

Miyey basaska dugsigu sii wadi doonaan inay shaqeeyaan muddada shaqo-joojinta?
Haa. Adeegyada gaadiidku isbeddeli maayaan waxayna sii wadi doonaan keenista iyo qaadista ardayda dugsiga sidii loogu talogalay.

Miyey isboortiyada iyo hawlaha kale ee dugsiga hortii - iyo dabadii ay sii socon doonaan inta shaqo-joojintu socoto?
Fadlan ka hubi dugsigaaga macluumaad dheeraad ah, maadaama tan ay ku kala duwanaan karaan dugsiyadu.

Siday wax noqonayaan haddii ilmahaygu qabo baahi gaar ah ama uu dugsiga ku qaato adeegyo gaar ah?
Waxaanu mudnaanta siinaa ardaydeena baahiyaha gaarka ah leh marka aanu samaynayno qorshaha shaqaaluhu ku hawlgalayaan inta shaqo-joojintu socoto. Haddii ilmahaagu leeyahay Barnaamijka

Waxbarashada Gaarka ah (IEP), qorshaha 504 ama baahiyo kale oo gaar ah, dugsigaaga ayaa kula soo xidhiidhi doona si uu kaagala hadlo adeegyada la siinayo.

Sida Loogu Diyaargaroobayo Shaqo-joojinta

Macluumaadkaagii ugu danbeeyay bixi
Xaqiiji in macluumaadka lagaala soo xidhiidhayaa uu yahay macluumaadkii saxda ahaa, kaas oo aad ama galayso Daaqada Waalidka (Parent Portal) ama la xidhiidhayso xafiiska hore ee dugsiga, si uu dugsigu kuula soo socodsiin karo wixii isbeddel ah ee lama filaan ah. Dugsigaagu waxa uu u baahanayaa lambarkaaga taleefanka, iimeylkaaga iyo cinwaankaaga guriga ee ugu danbeeyay ee waalidka, koriyaha iyo ciddii kale ee xaaladda gurmadka ah lala xidhiidhayo. **Sidoo kale, xaqiiji in dugsigaagu haysto liiskii ugu danbeeyay ee dawooyinka ilmahaaga**.

Ahaw mid xogogaal ah
DPS ayaa bixin doonta macluumaadka ugu danbeeyay ee degmada oo dhan ah oo waxay soo gelin doontaa websaytkeeda, teacherstrike.dpsk12.org, iyo sidoo kale baraha bulshada, iimeyl ahaan iyo fariin taleefanka ah ay ugu diri doontaa qoysaska. Waxaanu kugula dardaarmaynaa inaad si dhaw ula socoto macluumaadka dugsigaaga ka imanaya ee wixii macluumaad ah ee qoyska ah ku saabsan.

Ka qaybqaado
Waxaad wakhtigaaga ugu deeqi kartaa oo aad kaga shaqayn kartaa dugsigaaga oo aad ka caawin kartaa fasalka ama garoonka ciyaarta. Macluumaad dheeraad ah, la soo xidhiidh xafiiska soodhawaynta dugsigaaga ama khadka caawinta qoyska 720-423-3054.

Sida Ilmahaaga Aad Ugala Kala Hadlayso Shaqo-joojinta

Haddii macallimiintu shaqo-joojin sameeyaan, carruurtaada wakhti sii oo kala hadal waxa socda maadaama oo ay dhici karto in uu ilmuhu ku jahwareero arrintan. Si aanu kaaga caawino wada sheekaysigan muhiimka ah, waxaanu iskugu kaa dubbaridnay dhawr tilmaamood oo kaa caawin karta. Carruurta waxaa dhici karta inay ku jahwareeraan ama ka warwaraan. Xaqiiji inaad kala hadasho oo aad dhagaysato walaacoodana.

U sharaxa waxa shaqo-joojintu tahay (eeg bogga 2), in shaqo-joojintu tahay kumeel gaadh iyo in macallimiintu ku soo noqon doonaan shaqada marka shaqo-joojintu dhammaato.

Ilmahaaga ku dhiirigeli in uu sidii hore waxbarashadiisa xoogga u saaro.

Tilmaamaha heerka dugsiga hoose:
Marka aad la hadlayso carruur yaryar, u fududee sharaxa. U xaqiiji carruurta inayna jirin waxay ka warwaraani, oo uu yahay waxay dadka waawayni isku afgaran waayeen, oo ay u baahan yihiin uun inay ka wada shaqeeyaan sidii ay u xallin lahaayeen mushkiladdooda.

Tilmaamaha heerka dugsiga sare:
U sharaxa inay jiraan laba dhinac: DCTA iyo degmada dugsiga, iyo inay labadooduba isku dayayaan inay heshiiyaan oo meel dhexe oo labada dhinac midna waxba yeeleynin iskugu yimaadaan. Xaaladda u adeegso inaad ilmahaaga kagala sheekeysato waxyaabaha keena shaqo-joojinta.

Khayraad Waxtar ah

Khadka Caawinta ee Qoyska
- 720-423-3054
- 8 subaxnimo - 4:30 galabnimo, Isniin ilaa Jimce

Khayraadka Onlaynka ah
- www.dpsk12.org
- Facebook
- Twitter